Independent
Prisoner Complaint
Investigations

# Kuma faraxsanid sida xabsiga u maareeyay cabashadaada?

## Hey'adda Baaritaanka Madaxa Banaan ee cabshooyinka Maxaabiista (IPCI) ayaa ku caawin karto.

**Si madax bannaan ayaa loo baarayaa cabshooyinkaada**

# Ma ogtahay?

- Sanad walba kumanaan maxaabiis ah ayaa lasoo xiriiro  hey'adda Baaritaanka Madax Banaan ku sameeyso Cabashooyinka Maxaabiista (IPCI) si looga caawiyo cabashooyinkooda.
- Baaritaan ayaan ku sameeynaa cabashooyinkaas kadibna talooyin ayaan u gudbinaa xabsiyada.
- In ka badan afar meelood meel dacwadaha nasoo gaaro ayaan difaacnaa iyo ku dhawaad kala bar cabashooyinka hantida.
- Sidoo kale dhex dhexaadin ayaan samaynaa haddii ay suurtogaltahay si aan caawinaad uga gaynso xallinta khilaafyada cabashooyinka la xiriiro.
- Haddii aan kugu raacno, waxaa suurtogal ah inaad raalli galin, xaal marin ka hesho xabsiga taas oo la xiriirto hanti lagaa lumiyay ama lagaa dhaawacay ama wax ka baddal in lagu sameeyo qaabka uu xabsiga u shaqeeyo.

# Wax ku saabsan IPCI

- IPCI si buuxdo ayeey u badax banaantahay. Uma shaqayno Adeegga Xabsiga ama HMPPS.
- IPCI waxaa u hogaansantahay Xeerka 39, taasi macnaheedu waa waraaqaha aad noosoo qortaan shaqaalaha xabsiga ma akhrinayaan.
- Haddii aad noosoo cabato, taasi looma isticmaalayo si adag lagaagasoo horjeedo, taasi dhib kaamasoo gaarayo.
- Markii ay cabashadaada nasoo gaarto, 10 cisho gudahood ayaan kuugusoo sheegaynaa haddii aan baaritaan ku samaynayno cabashadaada.
- Sidoo kale haddii muddo 6 todobaad gudahooda ah uu xabsiga ugasoo jawaabi waayo cabashadaada, baaritaan ayaan ku samayn kartaa cabashadaada.

IPCI waxay qayb ka tahay Prison and Probation Ombudsman (PPO) oo ah hey'ad cabashooyinka baarto.

# Maxaan cabasho

**Waxaad cabasho uguasoo gudbinkarrtaa IPCI dhammaan arrimaha xabsiga oo ay kamid yihiin:**

- Hanti luntay, la xaday ama dhaawacantay.
- Haddii aad dareensantahay in garsooridda aanan loo raacin nidaamka saxda ah iyo IEPs.
- Xoog u sheegasho, cabsi galin ama kadeed ay kugu sameeyaan qaar shaqaalaha kamid ah.
- Haddii aadan ku faraxsanayn xaaladda xabsiga ama nidaamka xabsiga.
- Haddii shaqada si aan caddaalad ahayn lagaaga qaado ama lacag aad ku waayso.
- Haddii si aan habboonayn ay shaqaalaha awood kuugu isticmaalan.

Guud ahaan, baaritaan kuma samayn karno haddii ay kasoo wareegtay muddo 3 bilood ka badan markii uu xabsiga kusiiyay jawaabtii ugu dambeeysay oo lagaa siiyay cabashadaadii ugu horeeysay.

Haddii aanan baari karin cabshadaada, waxaa suurtogal ah inaan kuu tilmami karno qof ku caawin karo.

# Sida cabasho loo sameeyaa

- Marka hore xaqiiji inaad si buuxdo u marto nidaamka cabashada ee xabsigaada.
- Buuxi foomka IPCI adigoo noosoo sheegayo sababta aadan ugu faraxsanayn jawaabta uu ku siiyay xabsiga.
- Noosoo dir foomka IPCI iyo nuqul kamid ah foomkaada COMP iyo jawaabaha.

**Luqado badan ayaan ku turjunay macluumaadkan. Fadlan nalasoo xiriir haddii aadan heli karin qoraalkan kooban oo luqadaada ku qoran.**

# Meesha aad kusoo dirayso cabashadaada

**IPCI, Third Floor,**
**10 South Colonnade,**
**London, E14 4PU.**

Waana bilaash in IPCI warqad loosoo diro Xabsiga ayaa bixinayo farankaboolada.

Fadlan hanoosoo dwirin dukumiintiga asalka ah maadaama aanan soo celin karin.

